

Mashruuca kor u qaadista inta aad kala qabsaneysid shaqada dadka qoxootinimada loo aqoonsadey iyo dadka si ku meel gaar ahaan loo ogolaadey

## Ka caawinid xag shaqo



Fachstelle Integration Graubünden, Grabenstrasse 1, 7001 Chur

 Fachstelle Integration Graubünden  
Post spezialisà per l'integrazion dal Grischun  
Servizio specializzato per l'integrazione dei Grigioni



## Somalisch

Grabenstrasse 1  
7001 Chur

 081 257 26 38

[www.hallo.gr.ch](http://www.hallo.gr.ch)  
[www.fluechtlinge.gr.ch](http://www.fluechtlinge.gr.ch)



## **Qof ka ku caawinaya shaqadiisa waxay tahay**

- Inuu kuu diyaaryo ama qabanqaabiyo, uuna idiin dhexeeyo adiga iyo shirkada ama qofka shaqada ku siiyey, uuna la socdo ama kaa hubiyo inta lagu guda jiro isdhexgalka xaga shaqada ama aad kala qabsaneysid shaqada.
- In uu kaa xaqiijiyo ama kaa ogaado in heshiiska adiga iyo shirkada ama qofka shaqada ku siiyey si habسامي leh loo fulinaayo ama waafaqsan sharciga loogu dhaqmaayo aadna ku egtahay ama aad qabaneysid shaqadii lagu heshiyyey keliya dadka laga caawinaayo shaqada waa dadka shaqada si ku meel gaar ahaan loo qaatey iyo dadka qoxootinimada loo ogolaaday (vA/Flü) waxaana la ilaalinayaa ama la caawinayaa wada shaqaynta adiga iyo shirkadda idinka dhhexeya.
- Wax alle wixii ku saabsan Talo siin iyo caawinaad qofka vA/Flü inta lagu gudo jiro la qabsashada shaqada ama isdhexgalka shaqada.

## **Ujeedooyinka ama Himilooyinka**

In si dhab ay u dhengalaan bulshada iyo shaqada dadka loo aqoonsaday qoxootinimo und kuwa si ku meel gaar ah loo qaatey.

Ka qeybgalayaasha mashruucaan waxay heli doonaan ama baran doonaan sida looga shaqeeyo shaqooyinka kala duwan, wayna isku tijaabin doonaan shaqooyinka ay jecelyhiin in mustaqbalka ay ku shaqeystaan waxayna helayaan fursado ay ku qorsheytaan ama kaga miro dhalinkaraan barashada shaqada.



## **Ka caawinid xag shaqo**

### **Qofka kaa caawinaaya shaqada**

- Wuxuu kuu qorsheyn doonaa ama kula hubin doonaa himilooyinka aad higsaneysid sidaad ku gaari lahayd
- Wuxuu ku geyn doonaa ama kula eegi doonaa meesha shaqada wuxuuna kaagala qaybgalayaa wada hadalada ama heshiiska adiga iyo shirkadda idiin dhexmaraayo
- Wuxuu kula garab taaganyahay caawinaad hiil iyo hooba leh
- Wuxuu u taaganyahay sidii uu uga dhaadhicin laaha shirkadda in aad tahay qof laysku haleyn karo
- Wuxuu ku siinayaa talooyin aad u muhiimsan

### **Qofka shaqada raadinaaya ama shqao doonka ah**

- Waa in uu la yimaadaa ujeedooyin cad-cad ama himilooyinka uu higsanayo, lana yimaado kartidii lagu gaari lahaa himilooyinka
- Inta lagu guda jiro mashruucaan is dhengalka ah waa in uu raadsadaa shaqo
- In uu ku dadaalo uuna sameeyo wixii karaankiisa ah ama awoodiisa ah sidii uu shaqo ku heli lahaa

